



## Cleveland High School

3400 SE 26<sup>th</sup> Ave | Portland, OR 97202 | (503) 916-5120 | [www.pps.net/schools/cleveland](http://www.pps.net/schools/cleveland)

**Grover Cleveland High School waa mid kamid ah sagaal dugsi sare oo dadweyne oo ku yaal Portland, Oregon oo u adeega ku dhowaad 1585 arday oo ka socda xaafadaha isku dhafan dhaqan-dhaqaale ahaan ee gudaha koonfurta-bari ee Portland. Iyadoo ah dugsi sare oo afar sanno ah oo dhameystiran, Cleveland wuxuu caan ku yahay heerarkiisa tacliimeed ee sare ee dhammaan dhinacyada casharada, fursado badan oo farshaxan ah, iyo jawiga dugsiga oo soo dhaweyn leh.**

Xilligii deyrta ee 2020, Cleveland wuxuu helay laba abaalmarin oo qaran. Waxaa loo xushay Dugsiga Heerka Sare ee Farshaxanka ee NFHS, CHS waa Dugsigii ugu horreeyay ee magaalo ee ku guuleysta abaalmarintan. Waxaa lagu amaanay "heellanaantiisa tusaalaha mudan" ee farshaxanka, kooxayahayaga heesaha, u raxleynta, qoob-ka-ciyaarka, hadalka iyo dooda iyo barnaamijiyada masraxa ayaa la sharfay.

Intaa waxaa sii dheer, Special Olympics ayaa u magacawday CHS Dugsiga Horyaalka Qaranka ee Midaysan si loo aqoonsado dedaallada "in bulshadaada ay ka dhigto mid loo dhanyahay, oo ah meel wada aqbasho dhammaan dadka."

Fasallada waxaa lagu qabtaa dhisme taariikhi ah oo saddex dabaq ah, oo uu ku wareegsan yahay Southeast Powell Boulevard inta u dhexeysa waddooyinka 26 iyo 28 (26th and 28th Avenues), halka istaadiyaha cayaaraha ee dugsiga la dayactiray, oo uu leeyahay garoon cows iyo waddada-orodka oo dhammaan cimilooyinka ku habboon, oo ku taala meel u dhow.

Helitaanka iyo ku guuleysiga shaqada koorsada ku habboon ayaa la xoojiyay, oo ay ku jiraan barnaamijyo khaas ah oo lagu taageerayo Barteyaasha Luqadda Ingiriisiga, ardayda naafada ah, iyo kuwa loo qoondeeyay Qorshayaasha Waxbarshada Shaqsiyadeed (IEPs).

### Tusmooyinka Manhajka

- Casharada Shahaadada Caalamiga ah ee Baccalaureate oo leh fursad lagu kasbado shahaadada IB (IB diploma). Barnaamijka adag wuxuu ku dhiirigeliya ardayda adduunka oo dhan inay noqdaan kuwa firfircoona, naxariis leh oo nolosha oo dhan joogteeyaa barashada kuwaas oo gacan ka geysta abuuritaanka adduun wanaagsan iyada oo loo marayo fahamka iyo ixtiraamka dhaqamada kala duwan. Arday kasta oo fasalada hoose ayaa laga diiwaangeliya saddex qeybaha maadada IB ah: Bayoolaji, Taariikh iyo Ingiriisi.
- Koorsooyinka Waxbarashada Farsamada ee Shaqada (CTE) ee injaaarnimada/dhismaha, farshaxanka cunta karinta, soo saarka warbaahinta dhijitaalka ah, naqshadeeynta muuqaalada iyo isgaarsiinta ballaaran.
- Afar Luuqadaha Dunidda ah: Mandarin Shiineys, Faransiis, Jarmal iyo Isbaanish, laga bilaabo bilowga ilaa heerka shahaadada International Baccalaureate.
- Akademiyadaha fasalka 9aad: Ardayda cusubi waxay u gudbayaan dugsiga sare iyagoo ah Akadeemiyado yaryar oo ka kooban isla kooxdii ardayda ahayd islsa markaana helaya isla seddexdii macallin ee saddexda fasal ee aasaasiga ah. Ardaydu waxay helayaan faa'iidata lahaanshaha hal la-taliye afarta sanno ee dugsiga sare.
- Tiro badan oo ah bixinta koorsooyinka la doorto oo u dhexeeyaa bandhig faneed ilaa hadal iyo dood ilaa Tababar Xawaare Xoog ah illaa Barashada Maan-jooga iyo kuwo kaloo badan.

### Hadafka:

Cleveland High School wuxuu bixiyya fursado ay ardaydu u arkaan kuwo khuseeyaa, la heli karo oo tijaabiya. Waa xaa dhiirigalinaa muwaadiniinta firfircoona, masuulka ah waxaanaan bixinaa bulsho qof walba ka mid yahay. Dhammaan ardayda waxay helaan waxbarasho dhiirrigelisa hamigooda.



### Xaqiiqooyinka dugsiga

**Naaneysta:** Warriors

**Midabada dugsiga:** Cagaar rasiin ah & Jaalle qafiif ah

### Dhaqannada gaarka ah:

Hool qurxinta kulanka soo-laabashada iyo Tartanka Abaalmarinta Ruuxda; kullamada kala duwan ee dhamaan dugsiyada; riwaayadaha gaaban ee ay agaasimaan ardayda sare; "Springtasia", xaflad muusig iyo bandhig faneed



"Isku darka Cleveland ee barnaamijka IB iyo koorsooyinka farshaxanka heerka sare ah waxay ii saamaxeen inaan indha-indhaysto waxyabaha aan xiiseynayo tacliin ahaan iyo farshaxan ahaan, labadaba. Macallimiintu si aad ah ay u taageeraan mar walbanaa waxay qaadan doonaan wakhti ay ugula shaqeeyaan ardayda si madaxbanaan markay u baahdaan. Barnaamijka IB ee Cleveland wuxuu iga caawiyay inaan ka noqdo fikiraa qoto-dheer dhammaan dhinacyada noloshayda, waxaana dareemayaan inaan diyaar u ahay kulliyada sannadka danbe."

- Kate Daley, Qalinqabiye 2021



"Intii aan joogay Cleveland, waxaan la kulmay macallimiin fasalka kadib sii joogay si ay iila hadlaan, kuwaas oo ii helay fursado xiiso badan, isla markaana si aan xad lahayn iigu taageeray sooyaalkayga shahsiyadeed iyo waxbarasheed. Wuxaan Cleveland ka soo qaataf fasalo si weyn u beddelay ina baray qaabka aan dunida u arko. Wuxaan ka qeybqaatay waxqabadyo, barnaamijyo iyo saaxiibtinimo i siiyay fursado aan la soo koobi karin oo aan ku milicsado kuna koro. Wuxaan marwalba dareemi doonaa inaan ku faraxsanahay inaan ahaa Warrior."

— Lena Tinker, madaxweyne-wadaagaha qalinqebiyaashii 2021



### Ciyaaraaha Fudud iyo Waxqabadyada

- Dhammaan isboortiga OSAA ee la ansaxiyay: baysibool, kubadda koleyga, sacab-tunka, orodka, qoob-ka-ciyaarka, kubada cagta maretkanka, golofta, lakroos, ragbiga, kubada cagta, tartanka barafka, baraf simbiririxa, kubada-gacan tuurka, dabaasha, teniska, waddooyinka iyo garoonada, kubbadda laliska, iyo legdinta
- Barnaamijyada abaalmarinta ku guuleysatay ee kooxda muusiga, u raxleynta, iyo barnaamijyada hadalka iyo doodda
- Barnaamijka tiyaatarka oo soo bandhiga bandhigyo badan sannad kasta oo ay weheliyan soo saarid ay ardaydu maamusho
- Kooxda dastuurka "We the People" iyo kooxaha Mock Trial ayaa ku tartama munaasibadaha maxalliga ah iyo kuwa gobollada
- Naadiyada ay abaabuleen ardaydu waxay u dhixeyyaan ururada ardayda (Aasiyan, Madow, Latinx, Dhalad, Dadka Dega Jasiirada Baasifiga) ilaa awoodsiinta jinsiga ilaa Isbahaysiga Galmada & Jinsiga ilaa ururada adeegga.

### Adeegyada Ardayga

**Xarunta Kulliyada & Shaqada**— U heellan u adeegida ardayda dhammaan fasalada qorsheyntooda dugsiga sare kadib, Xarunta Kulliyada & Shaqadu waxay ardayda siisaa hagitaan ku saabsan shaqada, dugsiyada farsamada/xirfada, iyo kulliyadaha. Tabaruceyaasha CCC ee tababaran ayaa ardayda u caawiya si ballan la'aan ah ama ballan qabsasho ah.

**Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga Ku-Taala**— Waxay bixisaa adeegyo dhammaystiran oo ay ku jiraan baarida iyo daaweynta dhaawacyada/jirrooyinka; jimicsiga isboortiga; arrimaha caafimaadka maskaxda; ka hortagga uurka; iyo gudbinta ilkhaa iyo aragga. Waxay ku taalaa gudaha CHS muddo 28 sanno ah, Xarunta Caafimaadka, oo ay maalgeliso Degmada Multnomah, waxay u adeegtaa celcelis ahaan 75-80 boqolkiiba oo kamid ah ardayda.

**Xarunta Adeegyada Ardayda**— Waxay leeyihii xafiisyoo la-taliyayaal tacliimeed iyo shaqaalaha taageerada ardayda, oo ay ku jiraan shaqaale bulsheedka, khabiirka cilmu-nafsiga dugsiga, u-doodayaasha guusha ardayda, iyo isku-duwaha caddaalada.

"Wuxaan nahay Dugsi Caalami ah oo bixiya shahaadada International Baccalaureate oo u heellan ka taageerida in arday kastuu uu ka qalinqebiyo dugsiga sare oo uu si guul leh u galu kulliyad iyo/ama shaqo. Wuxaan nahay bulsho dugsiyeed u heellan inaan maamuusno kala duwanaanta ardaydeena iyo inaan siino fursad lagu maqlo laguna qiimeeyo dhamaan codadka ardaydeena. Wuxaan sii wadaynaa inaan ardaydeena ka qeybgalino khibradaha barashada ee dhaqanka la xiriira oo aan siino fursado ardayda si ay u sahamiyan waxa ay jecel yihiin iyadoo loo marayo koorsooyinka iyo howlaha kala duwan ee aan bixinoo."

— Jo Ann Wadkins, Maamule